

## **Waalid haddaad tahay waa in aad ilmahaaga ka caawiso waxbarashada**

adigoo raacaya talooyinkan soo socda:

- ilmaha iskooleeyda ahi wuxuu u baahan yahay inuu helo 10 saac oo uu hurdo.
- ilmaha iskooleeyda ahi wuxuu u baahan yahay inta aanuu subixii guriga ka bixin in quraac la siiyo, markuu iskoolka ka soo laabtona helo wuxuu afka ku dhufto oo cunto ah, casho iyo wuxuu fiidkii afka ku dhufto hurdada ka hor.
- ilmuhu waa inuu socdo oo banaanka u baxo maalin kasta. In lala ciyaaro oo wehel loo noqdo ilmaha iskooleeyd ah muhiim ayeey u tahay.
- ilmuhu waa in uu raaca sharciga iyo nidaamka lagu heshiiyo guriga ee u yaal daawashada telefishinka iyo ciyaaridda ciyaaraha geymamka. Waana in la raaco da'da ku qoran geymamka iyo filimada ee loogu talagalay inay daawan karaan.
- waa in waalidku ogyahay oo la socdo ilmaha iskool dhigashadoodu halka ay marayso. Waa in ay ilmaha maalin kasta weydiiyeen iskoolka siduu maalintaas u ahaa, sida:  
Wuxuu soo bartay? Cidduu maalintaas la ciyaaray? Weydiiyaan in laylisyoo loo soo diray? Waa in ay weydiiyaan in imtixaano ku soo socdaan ama waxyaalo muhiim ahi soo socdaan oo dhici doonaan?
- waa in aad kala xiriirto macalimadda arimaha dhammaan saamayn kara iskool dhigashada ilmahaaga ama waxbarashadiisa. Waalidku waxay xaq u leeyihiin in turjubaan loo qabto marka shirarka waalidiinta la qabanayo ama shirarka ilmahooda arimihiisa khuseeya oo ku shaqada leh.
- waalidku waa inay ilmaha u sameeyeen meel uu laylisyada kaga shaqeeyo.
- waalidku waa in haddii ilmuhu u baahdo in la caawiyo ay laylisyada ka shaqyntooda ka caawiyaan. Haddii aadan ka caawin karin, weydii macalimadda ama waalidiinta kale halka laga helo naadiyada laylisyada lagaga shaqeeyo.